

Fred Hutchinson Cancer Center  
University of Washington

**Ogolaanshaha Foomka Gaaban ee looga Qeybqaadanayo Daraasada Cilmi baarista**

Lambarka Borotokoolka: \_\_\_\_\_

Magaca Baaraha Guud: \_\_\_\_\_

*Haddii aad u adeegeysid sida wakiilka sharci ahaan loo ansixiyay ama aad tahay waalid/masuulka bixinayo ogolaanshaha canuga ee daraasadaan, erayada "adiga" iyo "waxaaga" waxaa laga wadaa qofka aad siineysid ogolaanshaha ama ogolaanshaha waalidnimada.*

**Waxaa lagu weydiyay inaad ka qeybqaadatid daraasada cilmi baarista.** Waa inaad waqtigaaga qaadataa markii aad go'aansaneysid haddii aad ku soo biireysid daraasada. Waxaad kala hadli kartaa dooqyadaada qof walba oo aad dooratid.

Ka hor inta aadan go'aansan haddii aad ka qeybqaadaneysid ama ka qeybqaadaneyn, waan sharaxeynaa:

1. Warbixinta ugu muhiimsan ee ku saabsan sababta laga yaabo inaad u rabsid ama aadan u rabin inaad ka qeybqaadatid daraasada;
2. Sababta daraasada loo sameeyay, waxa dhacayo inta lagu jiro daraasada, iyo inta daraasada soconeyso;
3. Nidaamyadee ayaa tijaabin ah;
4. Halisaha horay loo arki karo, raaxo la'aanta, iyo faa'idooyinka ku jiritaanka daraasada;
5. Badelo walboo faa'idada la filan karo ee ku jiritaanka daraasada; iyo
6. Sida arimahaaga gaarka iyo qarsoodiga loo illaalinayo.

Markii ay ku haboontahay waxaan sidoo kale sharaxeynaa:

1. Magdhow walboo la heli karo ama daaweynta caafimaadka haddii aad ku dhaawacantid daraasada;
2. Fursada halisaha weli waxba kama garaneyno;
3. Sababta laga yaabo in lagaaga saaro daraasada;
4. Qarashaad walba ee looga qeybqaadanayo daraasada;
5. Maxaa dhaca haddii aad go'aansatid in aad ka tagtid daraasada;
6. Goorta aad baraneysid wax ku saabsan natiijooyinka cusub ee la xiriirto daraasada;
7. Imisa qof ayaa loo qorsheeyay daraasada;
8. Sida warbixintaada iyo muunooyinka (sida dhiiga ama unugyada) loogu isticmaalayo daraasada iyo cilmi baarista mustaqbalka, iyo haddii aad heleysid wax daqli ah ee laga soo saaray badeecooyinka la hormariyay iyada oo la isticmaalayo muunooyinkaaga;
9. Haddii ogaanshaha hiddaha laga yaabo in lagu sameeyo muunooyinkaaga;
10. Haddii natiijooyinka cilmi baarista ee adiga ama caafimaadkaaga ku saabsan lagula wadaagayo adiga; iyo
11. Daraasado walboo iqtiyaar ah oo lagu weydiyo inaad ka qeybqaadatid.

Intaas waxaa dheer, haddii daraasada looga baahanyahay in la soo dhigo [clinicaltrials.gov](http://www.clinicaltrials.gov), waxaan sharaxeynaa in:

Sharaxaada tijaabadaan caafimaadka waxaa laga heli karaa <http://www.ClinicalTrials.gov>, sida uu amraayo Sharciga Mareykanka. Websaydkaan kuma jirayo warbixinta adiga ku aqoonsan karto. Badanaaba, websaydka waxaa ku jira natiijooyin kooban. Waxaad raadin kartaa Websaydkaan xili walbo.

## **Xaquuqahaaga**

Looma baahno in aad ku biirtid daraasadaan. Xor ayaad u tahay inaad haa ama maya dhahdid. Haddii aad ku soo biirtid daraasadaan, looma baahno inaad dhax joogtid. Waad joojin kartaa xili walba (xittaa inta aadan bilaabin ka hor). Ma jiraan ciqaab oo dhahitaanka maya ama joojinta. Daryeelka caafimaadkaaga joogtada ah isma badelayo.

Haddii aad ku xanuunsatid ama ku dhaawacantid daraasada, ma lumineysid kuwa walba oo xaquuqahaaga sharciga oo aad ku raadineysid lacag bixin adiga oo saxiixayo foomkaan.

Haddii aad ogolaatid inaad ku biirtid, waxaad heleysaa koobiga foomkaan iyo koobiga foomka ogolaanshaha luuqada Ingiriiska oo daraasada ah.

## **Wixii warbixin dheeraad ah**

Waxaad kala xiriiri kartaa maamulaha baaraha \_\_\_\_\_ meesha \_\_\_\_\_ xili walba aad su'aalo ka qabtid daraasada ama dhaawaca daraasada la xiriiro.

Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Agaasimaha Institutional Review Office ee Fred Hutchinson Cancer Center, aad ka wacayso taleefanka 206.667.5900 ama i-meelka [irodirector@fredhutch.org](mailto:irodirector@fredhutch.org), haddii aad su'aalo ka qabtid xaquuqahaaga adoo ah ka qaybgalaha cilmi baarista.

## **Saxiixa**

Haddii aad saxiixdid foomkaan, waxay la micna tahay in aan kuu sharaxnay daraasada, oo aad si iqtiyaar ah u ogolaatid ka qeybqaadashada.

\_\_\_\_\_  
Magaca Farta waawayn ku qoran iyo Saxiixa Ka  
Qaybgalaha Aama Wakiilka Sharciga ah, haddii uu jiro

\_\_\_\_\_  
Taariiqda

\_\_\_\_\_  
Xiriirka Wakiilka Sharci ahaan Loo ansixiyay ee Ka qeybqaadanayo, haddii ay quseyso

\_\_\_\_\_  
Magaca La qoray ee Turjubaanka/Marqaatiga iyo Saxiixa

\_\_\_\_\_  
Taariiqda